**Dowladda Soomaaliya**
**Sharci lamb. 26 ee 12 Disember 1958**
**Dorashooyinka siyaasadda**

MAAMULAHA GUUD

Kadib markii la garowsaday ansixidda Golaha Sharciga.

WUXUU SOO SAARAY
Sharcigan soo socda

## CINWAANKA 1AAD
Arrimaha Guud

### Qod. 1
### Tilmaamaha guud ee doorashooyinka

Xildhibaanado waxaa lagu soo dooran doono doorasho guud ah.

Cod bixiye kasta wuxuu leeyahay hal cod wuxuuna ka dooran doona musharaxidiinta aaga doorashada.

Codeyntu waa mid xor, toos ah oo haddana qarsoodi ah.

### Qod. 2
### Goobaha Doorashooyinka

Aag kasto ee degmo wuxuu noqon doona goob doorasho.

### Qod. 3
### Tirada Xildhibannada

Golaha Sharciga wuxuu ka kooban yahay 90 xildhibaan.

Tirada xildhibaanadda laga soo dooran doono goobaha doorashooyinka waxay ku qoran yihiin qoraalka halkaan ku lifaaqan.

Goob kasto waxaa ka soo geli karo xildhibaan oo loogu qeybiyey liiska xildhibaanada ah oo lagu saleyey codadka liiska codbixiyeyaalka midba midka uu ka badan yahay.

### Qod. 4
### Goobaha la Geeyey hal Liis

Codeyn kama dhici karto goobta la geeyey hal liis oo keliya.

Wasiirka Arrimaha Gudaha ayaa soo saari karo amarro ku aadan sidii loogu hortegi lahaa in codbixiyeyaalka ku qoran goob dorasho ay tagaan goob kale.

### Qod. 5
### Xubnaha Doorashooyinka

Waxaa ka mid ah xubnaha doorashooyinka:

— Saldhigyada doorashooyinka;
— Xafiiska doorashooyinka ee aaga;
— Xafiiska doorashooyinka ee degmada.

Labada xafiis ee ugu dambeeya waxay saldhigoodu yahay magala madaxda degmada.

**Qod. 6**
**Taarikhda iyo Muddada Codbixinta**

Muddada dorashooyinku waa shan beri oo ay ka bilaaban doonto kowda Maarso 1959.

**Qod. 7**
**Waajibaadka Damiirka ee Codeynta**

Gudashada waajibka madaniga ah ee in la codeeyo waa mid uusan qofkasto ka baaqan karin.

**Qod. 8**
**Saacadaha Howlaha Xafiisyada Doorashooyinka**

Si loo hirgeliyo howlaha doorashooyinka xafiisyada degmooyinka iyo kuwa dowladaha hoose waxay furnaan doonaa lixdanka beri eek a horeeya biloowga doorashooyinka sacaadaha 7:30 ilaa 12:00 duhurnimo iyo 16:30 ilaa 18:00 galabnimo maalmaha shaqada, laakin maalmaha nasashado sacaaduhu waxay bilaaban doonaan 8 subaxnimo ilaa 12ka duhurnimo.

## CINWAANKA 2AAD
Cod Bixiyeyaalka

**Qod. 9**
**Shurudaha Cod Bixiyeyaalka**

Waxaa cod bixiye ah muwaadin kasto ee Somali ah dhedig iyo lab.

1) Oo da'diisu tahay 18 jir sanadka doorashadu ay jirto;
2) In uusan saaraneyn amar xanibaad ah in uu qabto xafiis dowladeed;
3) In uusan xarig uusan ku jirin.

Wasiirka Arrimaha Gudaha waxaa lagu amrayaa in uu soo saaro nidaam lagu xaqiijin doono in cod bixiye kasto oo degan yahayn deeganka dorashada ay ka dhici doonto.

**Qod. 10**
**Aqoonsiga Cod Bixiyaha**

Aqoonsiga qofka codka bixin doono waxaa iska leh Saldhigga doorashooyinka qaabka ku qoran qodobka 44.

## CINWAANKA 3AAD
Cidda Doorasghda u Taagan iyo Liiska Musharaxiinta

**Qod. 11**
**Shuruudaha Musharaxiinta**

Waxaa xildhibaan loo dooran kara lab iyo dhedig kuwaas oo:

1) Sanadka doorashada ay gaareen ugu yaaran da'da 25 sano;
2) Oo qori kara akhrina kara afka Carabi ama Talyaaniga iyadoo intixaan gaar ah la gelin doono;
3) In aysan ku dhicin xukum maxkamadeed ee dembi kas ah oo aan ka badneyn 3 sano.

**Qod. 12**
**Shuruudaha lagu Xarimaayo Musharaxa**

Xildhibaan ma noqon karo:

1) Garsoore ah;
2) Militariga ama kuwa militari u yaalka ah;
3) Xeer-ilaaliyaha, Guddomiye Degmo iyo kuwa metelaaya degmooyinka.

Shuruudaha xariimaya doorashada musharaxa ee sare ku xusan laguma dabaqi karo cidii 60 beri ka hor intii aysan doorashado bilaaban isaga tegey howlahaasi.

Shaqaalaha maamulka dowliga ah, hey'adaha dowliga ee u xilsaaran ilaalinta Dowladaada oo loo doorto xilka xildhibaanimada waxay heli doonaan muddo lagu sugo muddada ay gudanayaan howlahooda barlamaanka.

Muddada suggidda waxay qiimo u leedahay dhinac dallacaada darajada shaqado oo uu haayey iyo mushaar kordhinta muddeysan, intii lagu jiro muddadasi, xildhibaanku wuxuu yeelanayaa oo keliya dhaqaalaha la xirira howlaha barlamaanka.

**Qod. 13**
**Is khilaafka**

Xilka xildhibaanimadu waxay khilaafsan tahay xilaalka La-taliye Dowladda Hoose iyo La-taliye Degmada.

Haddii loo doorto xildhibaan, La taliyenimadu wuxuu ka dhici doona muddo 15 beri gudahooda oo laga rabo in uu kala doorto labadda jago.

**Qod. 14**
**Liiska Musharaxiinta**

Liiska musharaxiinta waa in la isug xiririya qaab degmo oo leh lambar musharax oo aan ka yareeyn laba ku jibaar tirada xildhibaanada la rabo kana badneyn 3 jibaar.

Liiska waa in lagu qoraa magaca, midka aabaha iyo awoowaha, sanadka iyo goobta uu ku dhashay iyo haddii ay jiraan naynaas.

Liiska waa in tiro isku xigxigto ku qoran lagu muujiyaa sida ay u soo kale horreyen musharaxiintu.

Lama aqbali karo liis musharaxiin oo si ka duwan loo qoro.

**Qod. 15**
**Magac Bixinta Liiska Musharaxiinta**

Liisaska waa in ay yeeshan hal magac bixin.

Waxaa reeban in la keeno liisas lagu magac daray mid qabiil ama isir wato.

**Qod. 16**

**Saxiixayaasha Liisaska Musharaxiinta iyo Wakiiladooda**

Liisaska musharaxiinta waxaa hoos ka saxiixi doono shaqsiyaadka oo uu Guddomiyaha degmada uu ka soo dhex bixiye shaqaalaha deegaanka oo aysan ku jirin kuwa ka shaqeeyo Xafiiska Degmada, tira cod bixiyeeyaal oo aan ka yareen 200 kana badneyn ilaa 300.

Waxaa reeban in qof uu hoos ka saxiixo hal liis in ka badan.

Liis kasto waa in lagu qoraa magacyada iyo halka laga helo 3 qofood oo wakiil ah:

1) Kuwaas oo hor keeni doono liiska;
2) Kuwaas oo fulin doono howl kasta ee la xiriirta fulinta howlahaasi.

## Qod. 17
## Keydka Damaanadda

So bandhigga liis kasta waa in ay wehlisaa lacag keyd ah ee damaanad oo dhan Sh. 1,000 kursi kasto oo loo qondeeyey goob doorasho.

Lacagta damaanada ah waxaa dib loogu celin doona kadib markii liiska doorashado ay helaan tirada codadka lagu hanti karo xildhibaanimada ama haddii ay marxaladdu tahay mid hal liis oo qura: waxaa lacagtaasi lagu xareyn doonaa Maamulka.

## Qod. 18
## Astanta Liisaska Musharaxiinta

Liis kasta ee musharaxiinta waa in ay la socota astanta oo 4 mar la qoray. Astaamahu waa in ay ka duwanadaan kuwa la saaray liisaska horay loo soo gudbiyey ama ay xisbiyaal kale ay qaateen.

Astaamuhu waxay noqon karan mid sawir ah.

Waxaa reeban in astaamuhu yeeshay micno ama ujeedo dalal kale ama tilmaamo isir iyo qabiil.

## Qod. 19
## Qorallo Dheeraad ah ee lagu Xiri Doono Liiska Musharaxiinta

Kadib markii laga reebo shuruudaha ku qoran qodobada sare ku xusan, waxaa liisaska laga raaba in ay wehliyaan qorallada halkaan ku tilmaaman:

1) Caddeynta qofka lagu tilmaamay faqradda kowaad ee qod. 16 kaas oo qiraaya in saxiixyada liisaska isaga hortiisa ay ku dhaceen ama qof asiga uu u wakiishay;
2) Caddeynta musharax kasto in uu aqbalay musharaxnimadiisa, kaas oo saxiixisa ay ansixiyeen Duqa magagaalada ama ciddii uu u wakiishay.

## Qod. 20
## Soo Bandhigga Liisaska

Liisaska musharaxiinta waa in la horgeeya Guddomiyaha Degmada ka hor 55 beri ama saadda 12 ee 50 beri ka hor taarikhda ay bilaaban doonto codeynta.

Guddomiyaha Degmada, kadib markii uu hubsado in musharaxiinta ay kaamileen shuruudihi laga rabay, lagana saaro cidii fulin weysay shuruudahasi, wuxuu kormeerayaa in loo hoggansaday qodobada sare ku xusan.

Liis kasta oo loo aqoonsaday mid nidaamka dhowrtay, wuxuu Guddomiyuhu siin doona lambar is daba socda iyo warqad guddoon ah, wuxuuna dib ugu celin doona ciddii aan buxinin shuruudahaas isagoo u caddeyn doono asbaabta loo aqbali waayey liiskooda.

Liisaska oo sacadda markii ay tahay 12 ee maalinta 50 ee ka horeysa maalinta doorashada wuxuu Guddomiyaha degmada ku qori doonaa in la diiday.

## Qod. 21
## Liisaska la Diiday iyo Racfaankooda

Ciddii liiskooda musharaxiinta uu Guddomiyaha Degmada diido, waxay ciddii waakil uga ah u gudbin karaan ilaa iyo 45 beri ka hor maalinta doorashoyinka dacwad Garsooraha Degmada.

Garsooraha degmada waa in uu go’aan kama dambeys ah ka gaaray ilaa iyo 40 beri ee ka horaysa maalinta doorashooyinka.

Haddii go'aan laga gaari waayo muddadas dhexdeeda, dacwado waxay noqon doonta mi la aqbalay.

**Qod. 22**
**Nuqulka Liisaska**

Ka hor 35 beri intii uusan bilaabin doorashooyinka, Guddomiyaha Degmada wuxuu u soo gudbin doonaa Wasiirka Arrimaha Gudaha, Xeer Ilaaliyaha iyo Garsooraha Demada, nuqul liisaaska musharaxiinta uu guddomay oo lambar la siiyey sida ay u kala soo horeeyey iyo samballo astaamahooda.

**Qod. 23**
**Bandhigga Liisaska Musharaxiinta**

Guddomiyaha Degmada waxaa uu soo dhameeystiri doonaa bandhigga liisaska musharaxiinta, sida ay u kala horeyeen, astamaha cid kasta, 30 beri ka hor intii aysan bilaabanin codeynta, iyadoo lagu soo dhejin doono keydka degmoyinka iyo dowladaha hoose ama goobaha dadweynaha iyo qeybinta bulshada dhexdooda.

**Qod. 24**
**Wakiilada Liisaska**

Wakiilada lagu tilmaamay qodobka 16 waxay xaq uu leeyihiin in ay u dirsadaan wakiil liiska goobkasta iyo Xafiis doorasho kasto, kaas oo laga soo magaaabi doono codbixiyeyaalka aaga doorashada.

Wakiilkaasi wuxuu xaq u leeahay in laga taakuleeyo dhinaca howlaha goobta iyo xafiiska oo loo qondeeyey.

Caddeymihiisa waxay noqon doonaan kuwa lagu qoro keyda qorallada.

Qoraalka magacaabiska wakiilka waa in aysan ka daba marin 10 beri maalinta ay doorashooyinka bilaaban doonaan, taas oo la hor geyn doono Guddomiyaha degmada oo isagana siin doono wakiil kasta qoraal loogu fassaxa howlahaasi.

## CINWAANKA 4AAD

Goobaha iyo Xafiisyada Doorashooyinka

**Qod. 25**
**Goobaha Doorashoyinka: Tiradooda iyo halka ay ku Yaalan**

30 beri ka hor intii aysan bilaabanin doorashoyiinka, waxaa Wasiirka Arrimaha Gudaha, kadib markii uu la tashtay Xeer-ilaaliyasha wuxuu qondeynaya tirada iyo goobaha la geeyn doono aaga cod bixinta ee degmoyinka iyado lagu cabiray ballarka iyo qiyaasta tirada dadka halkaas ku nool. Waxaa mudan in 40 beri ka hor intii uusan bilaaban cod bixinta ay soo gaaran Wasaaradda wixii talo soo jeedin ah ee la xirira qiyaasta tirada cod-bixiyeyaalka goob kasta: kaas oo kursi-xil kasto uusan ka badnaan Karin ilaa laba kun oo cod bixiyeyaal.

Degma kasto lagama yareeyn karo 5 xil-kursi.

**Qod. 26**
**Qaabka Goobta Codbixinta**

Goobaha cod bixinta waxay ka koobnaan doonan Guddomiye iyo 2 kormeereyaal kuwaaso midka ugu da'da weyn uu noqon doono Guddomiye ku-xigeen.

Goob kasto waxay yeelaneysa Xoghaye.

Guddomiyaha iyo kormeerayaashu waxaa laga soo magacaabi doonaa cod-bixiyeyaalka, Xoghayahana waxaa laga soo dooran doonaa kuwa aan ahayn cod-bixiyee.

Dhammantood waxaa magacaabi doono Guddomiyaha Degmada, kaas oo leh awood in uu beddelo haddii loo baahdo.

Markii loo baahdo in la bedelo kormeerayaasha iyo Xoghayaha intii ay howlaha doorashooyinka socdaan, wuxuu Guddomiyaha goobta codbixinta kala soo bixi doona dadka la jooga goobta oo buuxiyey shuruudaha loo baahnaa.

## Qod. 27
## Xafiska Cod Bixinta ee aaga Doorashada

Xafiiska cod bixinta ee aaga doorashada wuxuu ka kooban yahay Guddomiye iyo laba xubin.

Xafiska kasto wuxuu yeelan doona hal Xoghaye iyo laba qofood oo u qeeybsan xisabaadka lambaradda. Guddomiyuhu iyo xubnaba waxaa laga soo magacaabi doona cod bixiyeyaalka, Xoghayana iyo u qeeysamayaasha xisabaaha waxaa laga soo magacaabi doono dadka aanan ahayn cod bixiyeyaal.

Dhammantood waxaa magacaabi doono Guddomiyaha degmada, kaas oo leh xatta awood isku bedel haddii loo baahdo.

## Qod. 28
## Xafiska Cod Bixinta ee Degmada

Xafiiska cod bixinta degmada wuxuu ka kooban yahay Guddomiyaha, Garsoorha degmada iyo laba xubin.

Xafis kasto wuxuu yeelan doona hal Xoghaye iyo Garsoore Degmo iyo laba xubin.

Xubnaha waxaa laga soo magacaabi doonaa dadka cod bixiyeyaalka ah, Xoghayaha iyo 2 u qeybsane xisabaadka lambaradda oo uu soo magacaabi doono Xeer-ilaaliyaha waxaa laga soo qaban doona dadka aan cod bixiye ahayn.

Haddii ay dhacdo in is bedelku adkaado, wuxuu Guddomiyuhu yeelan doona awood kala bedel.

## Qod. 29
## Wajiibaadka Xilka, Wargelinta iyo Dhaarta

Xilaalka CINWAANKA ani uu tilmaamay waxay leeyihin waajiibaad.

Cidna lagama masaabixi karo waajibaadkaasi haddii aysan jirin asbaabo la xaqiiyey.

Magacaabista xilaalkaani waa in lagu wargeliya dadka ay khuseeyso ugu yaraan 10 beri ka hor intii aysan bilaabanin dorashooyinka.

Intii uusan xambarsanin xilkaan, xubin kasto ee ka howl geli doonto goobta cod bixinta ama xafiiska cod bixinta waa in uu dhaar ku mara Qaadiga ama Garsooraha degmada isagoo leh:

“Waxaan dhaar ku maraaya Illahay hortisa in aan gudan doono howsha doorashooyinka ee la ii dhiibay si dacaad ah iyo dhowrista sharciga”.

## Qod. 30
## Shuruuda Sarkaalnimo ee Goobaha iyo Xafiisyada Cod-Bixinta- is Khilaafka

Inta ay socoto howsha dorashooyinka, xubnaha goobaha iyo xafiisyada cod-bixineed waxaay la mid yihiin sharciga hortiisa saraakiil gudanaya wajiib dowli ah.

Sidaas awgeed, xilalkaasi ma noqon karaan militariga ama militari u yaalka, madaxda aagaga maamulada, duqa magalada iyo La-taliyeyaasha degmoyiinka.

**Qod. 31**
**Habeeynta Goobaha iyo Xafiisyada Cod Bixinta**

Habeeynta goobaha iyo xafiisyada cod bixinta waxaa iska leh Guddonka degmoyinka iyo wakiilada degmoyingka kuwaaso oo aaga dowladda hoose u adeegsan doonaan maamulka dowladaha hoose oo ay khuseeyso.

Qalabeynta goobka cod bixinta waa in ay noqoto mid u qalma howlaha doorashooyinka.

Waa in halkaasi laga dhisaa 2 ilaa 3 qolal oo loogu tala galay in codeyntu noqoto mid qarsoodi ah.

**Qod. 32**
**Bandhigga Goobaha iyo Xafiisyada Cod Bixinta**

20 beri ka hor maalinta ay bilaaban doonto howlaha cod bixinta, Guddomiyaha Degmada wuxuu wargelin guud siin doona tirada iyo halka loo qondeeyey goobaha iyo xafiisyada cod bixinta iyadoo lagu qori doono bandhig lagu soo dheji doono keydka degmooyinka iyo dowladaha hoose ama goobaha ay dadweynuhu isugu yimaado iyo iyadoo la naadiyo.

**Qod. 33**
**Gunnoyinka Xubnaha Goobaha iyo Xafiisyada Codbixinta**

Gunnoyinka xubnaha goobaha iyo xafiisyada cod bixinta waxay maalin kasto qaadan doonaan:

- Guddomiyaha So 40
- Xoghayeyaal – xubnaha xafiiska codbixinta, U qeybsamaha xisabaadka lambaradda So 30
- Kormeereyaasha So 20

Gunnadaasi waxaay yeelan doonaan maalin kasta oo ay ka qeyb galeen howlaha doorashooyin ee goobaha iyo xafiisyada cod bixinta.

Gunnoyinka ay yeelan karaan kadib markii ay ka fogaadan goobtii ay deganaayey howl daradeed:

- Guddomiyaha So 25
- Xoghayeyaal – xubnaha xafiiska cod bixinta iyo U qeybsamayaasha xisabaadka tirakoobka So 20
- Kormeerayaasha So 15

**CINWAANKA 5AAD**
Xayeeysiinta Doorashada

**Qod. 34**
**Bilaabista iyo Hirgelinta Xayeeysiinta Doorashada**

Xayeeysiinta doorashada waxay bilaaban karta 30 beri ka hor intii aysan cod bixinta bilaabanin iyadoo si toos ah loo dhowri doono xuduudda iyo nidaamka uu sharcigu qeexaayo.

Waxaa reeban in xayeeysin toos ah ama mid dadban la fuliyo maalinta ka horeysa ama isla maalinta ay codbixintu socoto.

**Qod. 35**
**Shirarka**

Waxaa mudan in la dhowro amar sharciga lamb. 1 ee 20 Febarayo 1954 markii la fulinaayo shirarka ama isu imaad dadweyne ee xayeeysin ah.

Waxaa reeban in 2 shirar ay ka dhacaan isla hal aaga iyo isku maalin.

Lama ogola koox koox.

**Qod. 36**
**Boorarka iyo Warqadaha Xayeeysiinta**

Boorarka iyo warqadaha xayeeysiinta doorashooyinka waa in la horgeeya ugu yaraan 24 sac ka hor xafiiska Degmada.

Wax canshuur ah kuma waajibto.

Waxaa la xarrimay in lagu dhejiyo boorarka dhismooyinka diinta la xiriira haddii aysan marka hore jirin oggolansho laga helin milkiileyaasha.

**Qod. 37**
**Astaanta dharka**

Waxaa la xariimay in la xirto dhar militari ama lagu qaldi karo dhar militari.

**CINWAANKA 6AAD**
Coddaynta

**Qod. 38**
**Soo Gelista Goobta Coddeynta**

Kadib markii laga reebo xubnaha shaqada ka wada goobta cod bixinta iyo wakiiladaha liisaska musharaxiinta, waxaa kale oo soo geli kara goobta cod bixinta, ciddii leh xaq in ay ka coddeyso goobtaasi.

Cod bixiyeyaalku waa in ay hal hal u soo galaan goobta iyagoo aanan wadanin wax hub ama waxyeelo garsiin kara dadweynaha.

**Qod. 39**
**Awoodda Booliska ee Guddomiyaha Goobta Doorashooyinka**

Guddomiyaha goobta doorashooyinka wuxuu amri kara booliska aagaasi
Wuxuu ku amri kara ciddanka booliska in ay ka bixiyaan ciddii qalaalaso ka wada goobta cod bixinta ama dembi geysta.

Boolisku sooma geli karo goobta cod bixinta haddii uusan Guddomiyuhu codsanin
Maamulka madaniga iyo kuwa booliska waxaay u xil saaran yihiin in fududeeyan so gelitaanka goobaha cod bixinta iyo in ay firaaqeeyaan aagaga u dhaw goobahaasi.

Waa in warbixinnadaasi lagu qoraa qoraalka rasmiga ah
Awoodaasi kuwa la mid ah waxaa iska leh Guddomiyeyaasha xafiisyada cod bixinta.

**Qod. 40**
**Qalabka Doorashada ee Goobaha iyo Xafiisyada Codbixinta: u Diyaarinta**

Wasiirka Arrimaha Gudaha wuxuu ugu tali geli doona qalab hoos ku qoran goobaha cod bixinta:

1) Bashqad xiran ay ku jiraan astaanta goobta codbixinta;
2) Bashqad xiran oo ay ku jiraan kararka cod bixinta;
3) Sanduuqa cod bixinta,
4) Sanduuqa  lagu keydiyo kararka;
5) Tiro lambar oo warqado la daabacay oo loogu tala galay keydka cod bixiyeyaalka;
6) Tiro borar ah ee kormeerka loogu tala galay;
7) Laba qoraal oo loogu tala galay howlaha coddeynta;
8) Tiro qalmaan ah;
9) Hal dhalo ee qadda aan tirmeynin;
10) Qalabka xafiisyada iyo wixii kale oo loo baahdo.

**Qod. 41**
**Bolloyinka-Karaarka-Sanduuqyada-Qaanadaha**

Waxaa dhamman isku nooc ah bolloyinka, karaarka, sanduuqyada iyo qaanadaha coddeynta ee dalka oo idil.

Bolloyinku waxay  yeelan doonaan lambaro isku xig xigga oo is daba socda Karaarku waxay ka suubsan yihiin warqado isku nooc ah, isku midab ah waxaana la daabici doona nuqullo liisaaska oo didin sida ay u kala horeeyeen keenistooda.

**Qod. 42**
**Qalabka Coddeynta ee Loogu tala Galay Goobaha iyo Xafiisyada Doorashooyinka: habka loo Guddonsinayo**

Guddomiyaha Degmada wuxuu leeyahay ilaa 7 habeenimo ee maalinta ugu horreysa ee cod bixinta in lagu simo goob kasta ee cod bixin sanduuqa loogu tala galay.

Guddomiyuhu wuxuu  geyno doonaa ilaa iyo 8 ee maalinta ugu dambeeyo ee codbixinta sanduqyada loogu tala galay xafiisyada doorashooyinka ee aaga iyo deeganada.

Sanduuqyaadasi waxaa ku jira:
1) Laba nuqul  ee bandhigga liisaska musharaxiinta;
2) Nuqul magacaabinta xubnaha ay ka kooban yihin goobta iyo xafiiska cod bixinta;
3) Nuqul fassaxa  lagu magacaabay wakiiladaha liisaska.

**Qod. 43**
**Dismaha Goobta Cod Bixinta – Furitaanka Coddeynta**

Guddomiyuhu kadib markii uu guddomo sanduuqa ay ku jiraan qalabka doorashooyinka sida ku cad qod. 42 wuxuu:
1) Isugu yeeri doona xubnaha kuwaas oo ay ka mid yihiin kormeerayaasha iyo Xoghayaha;
2) Wuxuu ugu yeeray in ay ka qeyb qaatan howlaha doorashooyinka wakiiladaha liisaska;
3) Kadib markii oo uu tuso in sidii loo soo xiray ay xiran yihiin, wuxuu furi doona sanduuqa wuxuuna tiri doona qalabka ku dhex jiray;
4) Kadib markii oo uu tuso in ay weli xiran yihiin, wuxuu furi doona bashkhadda ay ku jiraan shabbadda  goobta coddeynta, iyo karaarka coddeynta, wuxuuna gelin doona sanduuqa loogu tala galay, isagoo lambarka shabbadda iyo lambarka kararka lagu qori doono keyda qoraalka;

5) Wuxuu xajiinaya in sanduuqa loogu tala galay in la geeliyo karaarka codeynta ay maran tahay, wuxuu ku xiri doonaa furo isagoo daloolka la gelinayo karaarka uu ka reebi doono;
6) Wuxuu amrayaa in albaabka kore lagu dhejiyo lisaaska musharaxiinta;
7) Wixii qalab ah ee soo haray wuxuu ku wareejin doona Xoghaaha;

Howlahasi waa si hufan loo qabto muddo yar kadib markii Guddomiyuhu uu caddeyo in coddeynta la bilaabi doono.

**Qod. 44**
**Cod Bixiyeeyaalka**

Codbixiye kasto wuxuu xaq u yeelan doona in uu codkiisa ka bixiyo goobta cod bixinta ee loo qondeeyey kadib markiI:

1) Uu caddeyo macluumaadka guud ee isaga la xiriiro sida, sanad uu dhashay, meesha uu ku dhashay kuwaas oo uu Xoghayahu ku qori doono keydka codbixiyeeyaalka;
2) Uu ka helo aqoonsiga in uu yahay qof xaq u leh in uu codkiisa bixiyo, kadib markii la maqlay aragtida wakiiladaha liiska ama lagu aqoonsaday qoraallada iyo marqaatiga ama wixii kale oo caddeyn ah;
3) Uu saaro suulka qadda aan tirtirmeynin buuga keyda codbixiyeyaalka;
4) Waxaa la saari doona gacanta amase dhudhunka codbixiyaha calaamadda aan tirtirmeynin sida uu qeexayo amarka Wasiirka Arrimaha Gudaha ee sharcigaan.

**Qod. 45**
**Cod Bixiyeyaalka Diidmada la Saaray**

Cod bixiye kasta waa in iska xaadiriyaa goobta coddeynta si uu codkiisa u bixiyo.

Cod bixiye aan awood u leheen in uu iska xaadiriyo goobta codbixinta oo sidaasna loogu aqoonsato waxaa Guddomiyuhu u oggolaan karan in uu qof uu ku kalsoon yahay uu gacan ka siiyo.

Xoghayuhu waxaa in uu ku qora buugga keydka in loo amray in takuleeyntaasi dhacday oo qofka la magacaabay uu qof kale ka caawintay sidii uu u coddeyn lahaa.

Shahaado takhtareed looma baahna laakin haddii la hor keeno waxaa lagu dhejin doona buuga keyd ah.

**Qod. 46**
**Habraaca Coddeynta**

Cod bixiyeyaalku waxaa u soo kala horimari doonaan hadba sidii ay u soo hala horreyeen.

Waxaa ugu horreya howlgalka goobta doorashada dadka wada, wakiiladaha liisaska, militariga iyo kuwa militariga u yaalka ah ee qaabilsan nidaamka guud iyo shaqaalaha maamulka dowlada.

Sida ku xeeran qodobka 43 wuxuu Guddomiyuhu amri doona biloowga coddeynta, cid kasta ee loo aqonsado in uu xaq uu leeyahay in uu coddeyo waxaa la siin doona qalin iyo kaar oo horay loo shabbadeyey eelaga soo bixiyey khanadaha loogu tala galay.

Cod bixiyuhu waa in uu gala qolka yar ee coddeynta isagoo aan loo dhaweeyn waa in codkiisa ku muujiya karka la siiyey oo uu ku xarigo calaamada godka loogu tala galay.

Waxaa reeban in calaamooyin kale ama tilmaamo kale lagu dhigo.

Cod bixiyuhu waa in uu kadib isku laaba kaarka isagoo raacaya laynka ku qoran si toos ahna iskugu daboolaa.

Wuxuu markii uu dhameeyo howsha qoritanka waa in uu codbixiyuhu gacanta ka saara kaarka iyo qalinka Guddomiyaha, kaaso uu hubsan doono in kaarku la daboolay, oo ay waafaqsan tahay nooca iyo shabbada goobta doorashadu, markaas kadibna waxaa la gelin doona sanduuqa codbixinta.

Mid ka mid ah howlwadeena goobta wuxuu hubsanaya in qofkaasi uu codeeyey wuxuu ku qori doona magaciisa agtiisa calaamadiisa oo caddeyn doono in qofkaasi uu coddeyey.

Kaarkii ay ka maqan yihiin shabbada ama aan ku nooc ahayn karaarka kale lama gelin karo sanduuqa, ciddii la timaad karkaasi looma oggalan doono in uu coddeyo (haddii sababta ka maqnashaha shabbadu ay tahay mid ku timid qalad Guddomiyaha ama howlwadeen goobta cod bixinta). Karaarkasi waa in isla markiiba uu Guddomiyuhu ansixiya ama kormeeraha, kaas oo lagu lifaaqi doono buugga keydka ah oo tilmaami doono in aysan soo gaarin ilaa iyo waqtiigaas.

Haddii cod bixiye ay ka baaba’do kaarka cod bixinta ama taxadir la’aan iyo jaahilnimo uu isaga iska haleeyey, wuxuu weydisanaya Guddomiyaha kaar cusub isago kii xumay u celin doono, Guddomiyuhu wuxuu kaarkasi ku xareyn doonaa bashqad oo uu korka ka saxiixi doono isagoo uu hal kormeere wehliyo.

Waxaa lagu qori doono qeybta cod bixiyaha ay khuseeyso tilmaam in loo bedeley kaarka.

Guddomiyuhu kadib markii uu aqonsado in cod bixiye uu si kas uu isku daahinayo ama uusan ka jawaabeeynin codsiga in uu dib ugu soo celiyo kaarka wuxuu amri kara in laga saaro goobtaasi, haddii loo bahdana in uu dib loogu soo celiyo goobta coddeynta kadib markii dadka dhan ay coddeyeen.

Buugga keydka waa in lagu qoro magaca cod bixiyahaas iyo falalka ka dhacay goobta cod bidinta.

## Qod. 47
## Sacaadaha Howlaha Cod Bixinta

Howlaha cod bixinta waxay socon doonaan si aan kala go’ lahayn muddada u dhexeysa 7 ilaa 18.

Maalin kasta kadib markii ay dhammato howlaha cod bixinta waxaa la soo uruurinaya kadib markii la wada baaray, qalab oo idil, oo ay ka mid yihiin karaarka aan la isticmaalin iyadoo tiradooda lagu qori doono buugga keydka laguna keydin doono qanaadaha u gaarka ah.

Qanadahaasi waa in markale la qufulaa iyadoo marqaati loogaga dhigi doono xubnaha goobta coddeynta, kuwaaso oo lagu xanaaneyn doono goobta iyadoo ay ilaalin doonaa ciidaanka u xil saaran.

Maalinta ku xigta howlaha cod bixinta waxay ka blaaban doona meeshi maalintii hore ay ku eekaayeen.

Maalinta ugu dambeyso howlaha codbixinta waxaay socon doonana ilaa 12 saac: laakin codbixintuu way socon doonta ilaa iyo intii cid dooneyso cod bixin la suuliyo.

**Qod. 48**
**Ku Dhawaaqidda Goob Coddeynta**

Goobta coddeyntu waxay ku dhawaaqi karta si ku meel gaar ah natijada isago lagu qori doono buuga diwaanka, iyadoo tixgelin la siin doono qod. 56 ee la xiriiri wixii muran, shil iyo dhibaato ka dhacay isla goobtaasi.

**CINWAANKA 7AAD**
Soo Uruurinta Karaarka – Baarista

**Qod. 49**
**Howlaha hordhaca ah**

Kadib markii cod bixiyeyaalku ay coddeyaan, Guddomiyuhu, wuxuu naadifin doona misaaska wixii warqado ama qalabka aan loo baahneyn si loo aruuriyo karaarka iyo in la baaro.

1) Waxay ku dhawaaqi doonta in howlaha coddeyntu ay dhamaadeen;
2) Wuxuu tirinayaa tirada cod bixiyeyaalka eek u qornaa buugga diiwaanka;
3) Wuxuu soo bixinaya karaarka isagoo tirinaayo kuxa aan la isticmaalin oo uu ku xareyn doono bashkhadda lamb. 1;
4) Wuxuu saxiixi doona bashkhaddasi asigoo iyo ugu yaraan 1 kormeere warqad kasta ee diwaanka cod bixiyeyaalka wuxuuna ku xiri doona bashkhadda lamb. 2;
5) Wuxuuna saxiixi doona isagoo ay wehliso kormeereyaasha kararka laga celiyey cod bixiyeyaalka sida ku qoran qod. 48 madama ay ahaayeen kuwa xumaaday ama khilaafsan kuwa goobta bixinta shabbadiisa wuxuuna ku xiri doono bashkhadda lamb. 3.

**Qod. 50**
**Soo uruurinta karaarka iyo baaristooda**

Kadib markii uu fuliyo howlaha ku tilmaaman qodobka 49, Guddomiyuhu wuxuu:

1) Ku dhaqaaqi doona soo ururinta karaarka Sidas awgeed kormeerasha loogu tala galay waxay mid mid u soo saari doonaan karaarka waxayn u dhiibi doonaa Guddomiyaha, kaas oo cod dheere ku dhawaaqi doono qolada loo codeeyey ee liska ku qoran, wuxuu tusinayaa wakiiladaha liisaska kale wuxuna u gudbinaya kormeeraha kale, kaas oo isagoo oo wehliya Xoghayaha, ku qori doono boorka codka cid kasto ay heshay wuxuuna gelinaya kaarka la isticmaalay khanadda markii hore laga soo saaray.

Waxaa reeban in kaar laga soo saaro iyadoo marka hore karkii kaas ka horeeyey aanan la geli khanadda loogu tala galay.

Karaarka waxaa taaban karo oo keliya howlwadennada goobta coddeynta.

2) Wuxuu hubsanayaa tirada karaarka la soo ururuuriyey wuxuuna la bar bar dhigayaa tirada cod bixiyeeyalka lagu qoray bugga diiwaanka iyo tirada codbixiyeyaalka liisaska musharaxiinta ku qornaa, laga reebo codadka noqday kuwa wax kuma oolaan ah ama muran ka taagan yahay ee liis kasta.

3) Wuxuu hubsanaya isku dheeli tirka lambarada ku qoran qeybaha kale duwan ee diiwaanka, haddii ay muqato kale geddisnaan waxaa laga raba in uu sababeeyo.

4) Wuxuu saxiixi doona iyo saxiixa ugu yaraan hal kormeere:

— Karaarka noqday wax kuma olaan ama muran ka dhashay sida ku cad qod. 52;

- Kararka ay wehliyaan dood kuwaas oo ku xiri bashkhad lambarkeedu yahay 4.

5) Wuxuu ku aruurin doona bashkhadda lamb. 5 kuwa kale oo karaar ah
6) Wuxuu hubsanayaa oo caddeyn doono tirada coddeynayaa, coddadka saxda noqday iyo codbixiyeyaalka liisaska ku qoran.

### Qod. 51
### Qabaabka kale Duwan, Diiwangelinta, Bashkhadaha

Howlaha lagu carifay qod. 49 iyo 50 waa in loo hirgeliya si aan kala go' lahayn ilaa iyo intii habka loogu tala galay loo fuliyo.

Wixii xog xisaabeed ama falloyinka loo baahdo waxaa lagu qori doonaa buugga keydka.

Bashkhadaha lagu tilmaamay qod. 49 iyo 50 wa in lagu qufulaa shabbada goobta coddeyntana la saaro qeybta sare iyado weliba Guddomiyaha iyo ugu yaraan hal kormeere uu saxiixi doono.

Isla booggahisi sare waxaa lagu qori doonaa waxaa ku jira bashkhadda dhexdeeda.

### Qod. 52
### Codadka Qasaara iyo kuwa lagu Murmay intii ay Socotay Uruurinta Kararka

Waxaa waxba kama soo qaad ah karaarka la soo uruuriyey:

- Haddii kararku ay nooc ka duwan yihiin kuwii loogu tala galay;
- Haddii aysan wadanin shabbada goobta codbixinta;

Waxaa noqon kara kuwa qasaaray karaarka:

- Lagu arko xariiqmo lagu kor qoray ama calaamado aan loo baahneyn oo si kas ah loogu qoray;
- Haddii aysan tilmaameynin wax cod ah ee liiska ama aysan caddeyn ciddii ay u coddeyeen.

Karaarkaasi waxaa kuwa qasaaray hadii wakiiladaha liiska ee goobta xaadirka ku ah ay isku racaan si uu qabo Guddomiyaha iyo 2 kormeere.

Haddii la isku af garan waayo, kaarka la isku qabsaday waxaa qo'aan ka gaari doono Garsooraha degmada sida ku cad qod. 56.

### Qod. 53
### Dib u Dhigis Howlaha Tirinta iyo Kormeerka

Haddii ay dhacdo in la dhameeyn waayo howlaha tirinta karaarka iyo kormeerka waxaa Guddomiyuhu dib ugu dhigo doonto maalinta ku xigta sida ku qoran qod. 47.

### Qod. 54
### Diwaan Goobta Cod Bixinta

Diwaanka goobta cod bixinta waxaa lagu qori doonaa 2 nuqul.

Nuqulka kowaad, oo ay ku lifaaqan yihiin qoralaadaiisa iyo qalabka soo haray waa in lagu xiro sandhuuqa loogu tala galay ee yaala xafiiska doorashooyinka ee aaga si loo fuliyo qodobka ku xiga, nuqulka labaad waa in loo dhiiba Guddomiya degmada.

## Qod. 55
## Howlaha Xafiiska Doorashooyina ee Aaga

Xafiiska doorashooyinka ee aaga waa in uu helaa sanduuqyada goobta, iyadoo la huhsanayo in ay u dhan yihiin qorallada doorashooyinka ee loogu tala galay-waxaa laga soo bixinayana buuga keydka iyo intii qalab ah oo loo baahdo.

Waxaa haddaba la fulin doona arrimaha soo socda:

1) Xisaabinta lambaradda cod bixiyeyaalka ee goobaha doorashooinka, wuxuu caddeynaya tiradooda isagoo isku daraaya tirada codadka saxda noqday ee laga soo ururiye liisaska goobaha doorashooyinka;
2) Wuxuu hubsanayaa codadka qasaaray ama muranka ka taagan yahay;
3) Wuxuu hubsanayaa natiijooyinka baarista.

Qoriista macluumaadkaan waxay noqon doonta 2 nuqul.

Nuqulka kowaad waxaa loo gudbin doonaa sida ku xusan faqradda 2aad ee qod. 42 Guddomiyaha degmada ee xafiiska doorashooyinka degmada iyadoo qoraaladiisa wato.

Nuqulka labaad waxaa loo diri doona Guddomiyaha Degmada.

Kadib markii ay dhamaadan howlaha doorashoyinka xafiiska doorashooyinka ee aaga wuxuu u diri doona sanduuqiisa iyo sanduuqyada dhan ee goobaha doorashoyinka oo wato qoralladoda iyo qalabka coddeynta oo si hagaagsan loo qufulaya xafiiska doorashooyinka ee degmada.

## Qod. 56
## Howlaha Xafiiska Doorashooyinka Degmada – ku Dhawaaqidda Ciddi ku Raysay Coddeynta

Xafiiska doorashooyinka ee degmada wuxuu guddomaya sanduuqyada goobaha doorashooyinka iyo kan aaga, waxay hubsanayaan in qoraallada loogu tala galay cod bixinta ay ku dhan yihiin- waxay kala bixi doonaan buugga keyda iyo wixii kale oo loo arko in ay u bahan yihiin.

Garsooraha degmada isagoo ay taakuleynayaan xubnaha xafiiska:

1) Wuxuu hubsanayaa tirada liis kasta ku qoran;
2) Wuxuu go’aan ka gaaray wixii kaar ah ee muran ku jira, isagoo saxi doono tirada cod bixiyeyaalka liiska ku qoran;
3) Wuxuu xisaabin doonata inta u dhigmata ee cod bixiyeah ah, isagoo u qeybinaaya tirada guud ee cod bixiyeyaalka ee liisyada oo idil tirada xildhibaanadda la rabo in la doorto;
4) Wuxuu u qeybin doono liis kasta kuraasta ka soo geli doono oo ku saleeysan tirada cod bixiyeyaalka, kuraasta soo hara ay qaadan doonaan ciidi tira badan hesho, haddii ay isku bar bar dhaaan waxaa la isticmaali doona nasib turasho;
5) Wuxuu ku dhawaaqaya cidii ku raysay doorashada, iyadoo habka sida ay u qoran yihiin la raaci, tirada musharaxiinta oo la eg tirada kuraasta lagu tartamay.

Haddii ay noqoto hal liis oo musharaxiin, kulli inta xildhibaa ee ku qoran liiskaasi waxaay ka soo geli doonaan aaga doorashoyiinka ee loo qondeeyey

Sanduuqyaada doorashooyinka ee goobaha doorashooyinka iyo xafiisyada doorashooyinka ee aagaga iyo degmooyinka waxaa lagu xaneeyn doonaa xafiiska Guddomiyaha degmada ilaa iyo intii Garsooraha degmada oo uu aqbalo sida ay cod bixintu u dhacday.

Buugga keyda howlaha doorashoyinka waa in 3 nuqul lagu qora

Nuqulka koowad waxaa iska leh Garsooraha degmada isagoo la tixgelinayo qodobka soo socda.

Nuqulka labaad waxaa iska Xeer Ilaaliyaha.

Nuqulka seddaxad waxaa loo diri doona Guddomiyha degmada.

**Qod. 57**

**U Gudbinta Qoraallada Doorashooyinka Garsooraha Degmada**

Kadib markii uu helo nuqul kowaad ee buugga keydka ee xafiiska doorashooyinka, Garsooruaha degmada wuxuu 15 beri gudahooda maalintii lagu dhawaaqay natiijada, helitaaanka qoraallada goobaha iyo xafiisyada doorashooyinka oo idil.

**Qod. 58**

**Ansixidda Doorashooyinka**

Garsooraha degmada wuxuu leeyahay in uu ansixiyo natiijada doorashooyinka

Wuxuu kala saaraya kararka muranka ku jiray, kuwa aan lagu qanaacsaneyn ee ay horkeenen goobaha iyo xafiisyada doorashooyinku.

Muraanka oo aan la hor keeninsi toos ah xafiisyada sare ku xusan, waxaa loo horgeeni doona Garsooraha degmada, muddo 15 beri gudaheeda maalinta lagu dhawaaqo.

Laguma dhawaaqi ansixid iyadoo aysan 30 beri ka soo wareeganin ku dhawaaqiddasi.

**Qod. 59**

**Cidda ku Raysay**

Haddii sabab kasto ha ahaatee uu xildhibaan kursigiisa uu banaanado waxaa iska leh awood Garsooraha degmada ciddii musharax ah ee ku xigay liiska doorashooyinka.

**Qod. 60**

**Musharax laga Doorta Goob tiro badan**

Haddii xildhibaan laga soo doorto goob doorasho oo hal goob ka badan waa in uu 5 beri gudahooda ku doortaa goobta uu doonayo in loogaga dhawaaqo dorashadiisa.

Haddii ay tas dhici weyso waxaa lagu dhaqaaqi doona nasiib tuur.

Howlaha bakhtiya nasiibka waxaa la horgeyn doonaa Wasiirka Arrimaha udaha, sarkaal loo xilsaaray iyo 3 wakiil ee ka socda xisbigaasi.

Haddii ay sabab kasto ha ahaate uu hal kursi noqdo mid faaruq ah waxaa la tixraacaya tilmaamaha qodob sare ku xusan.

**CINWAANKA 8AAD**

Amaradda Ciqaabta

**Qod. 61**

**Carqaladeynta Xuquuqda Xayeysiinta**

Ciddi iyadoo isticmaaleysa wax kasto hor istaagta, ama qalaalaso gelisa shir xayeeysiin doorashooyin, ha ahaado mid gaar ama mid dadkoo idil u dhexeeya, ama is hortaaga ku dhejinta bandhigyada dowladda ee la xirira howlaha doorashooyinka ama is hortaaga faafinta qoraalaha xayeeysiinta, ama baabi’iya bandhigyada iyo

boorarka  iyo faafintiisa, wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa 2 sano iyo ganaax ilaa So 2,400.

Isla ciqaabtaasi waxaa muteysan doono ciddi iyadoo isticmaaleysa qalabka xayeeysinta oo sharcigu uusan u oggolaanin.

**Qod. 62**
**Isku Qorid Liisas badan**

Ciddi ay ku caddato in uu isku qoray hal liis ka badan wuxuu muteysan doona xarig ilaa 1 bil iyo ganax ilaa So 100.

**Qod. 63**
**Isku Dayidda ku Xad Gudubka Xuquqda isku Qoridda Liiska iyo Xaqqa Coddeynta**

Ciddi, si uu ugaga faa'ideysto ama cid kale ugaga faa'ideeyo, ka sasabto sixiixa liiska musharaxiinta , ama helo cod, ama ka aamuso, ama ballan qaad suubiyo ama lacag bixiyo ama shaqo bixiyo wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa 1 sano ama ganax ilaa So 1,200.

Isla ciqaabtaasi waxaa muteysan doono cod-bixiyaha, oggolada ama u diida wakiilnimada liiska musharaxiinta, siiya ama u diida codkeeda kadib markii uu aqbalo ballanqaad ama lacag la siiyey ama anfac kale ee khaas ah.

Ciddii iyadoo isticmaaleysa shaqaaqad, handadaad, qiiyaano ujeedadiisa ku tilmaaman tahay faqradda 1aad ee qodobkaan wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa 2 sano iyo ganaax So 2,400.

**Qod. 64**
**Shaqaaqado lid ku ah Howladha Doorashooyinka**

Ciddi handaad iyo falal shaqaaqad leh u geysta hab u socodka howlaha doorashooyina ama is hortaaga coddeynta xorta ah wuxuu muteysan doona ilaa 2 sano oo xarig ay iyo ganaax ilaa So 2,400.

**Qod. 65**
**Iska soo Gelidda Goobta Coddeynta**

Ciddii iyadoo xaq u laheyn iska soo gasha intii ay socdaan howlaha doorashooyinka goobta doorashooyinka ama qolka odeynta, halkaas oo iska joogo kadib markii loo sheegay in uu iskaga  soo baxo wuxuu muteysan doono xarig ilaa 1 bil iyo ganaax ilaa So 100.

Haddii uu hub sito waxaa lagu xukumi doona xarig ilaa 1 sano iyo ganax ilaa So 1,200.

**Qod. 66**
**Coddeynta Qaladka ah**

Ciddii iyadoo og in ay xaq u leeheen in ay coddeyso ama iska soo dhigto cid kale si uu coddeyey, ama goobo badan isku dayo in uu ka coddeyo, ama isagoo taakuleynaha qof aan coddeyn karo ugu qoro meel uusan raali ka ahayn wuxuu muteysan doona xarig ilaa 6 bilood iyo ganaax So 600.

Isla ciqaabtaasi waxaa muteysan doono cidii u oggolaaday qof aan lahayn xaq in ay codeyso ama u diido cid xaq u leh amase been abuur ka sameeyo  aqoonsiga qof coddeynaya.

Isla ciqaabtaasi waxaa loo kordhiyey ilaa 2 sano oo xarig iyo ganax ilaa So 2,400 haddii dembiyada sare ku xusan uu galay qof u shaqeeya maamulka dowladda.

**Qod. 67**
**Dib u soo Celinta Kaarka Coddeynta**

Cod bixiyaha diida in uu dib u soo celiyo kaarka coddeynta ama jexjeexa, ama rafaadiya si aan loo isticmaalin wuxuu muteysan doona ganaax ilaa So 600.

**Qod. 68**
**Been Abuurka, Qarista iyo wax ka Bedelka Qorallada Dorashooyinka**

Ciddii suubisa si guud ah ama dhinac liisaska musharaxiinta, diiwanka cod bixiyeyaalka, karaarka, ama qoraallada ku xusan sharcigaan ee howlaha doorashooyinka, ama wax ka bedella, qariya, ama baabi'iya ama isticmaala qorallo been abuur ah, xatta haddii uusan qeyb ka qaadan arrimahas, wuxuu muteysan doona xarig ilaa 2 sano iyo ganaax ilaa 2,400.

Isla ciqaabtaasi waxaa muteysan doono ciddii wax ka bedesha natiijada coddeynta.

**Qod. 69**
**Falalka ama ka Gaabsiga Arrimaha Sharcigaan ee Howlwadeenada Goobaha iyo Xafiisyada Doorashooyinka**

Ciddii iyadoo ka howlgaleyso goob ama xafiis doorasho ku kacda dembiyada ku qoran qodobada sare ku xusan wuxuu muteysan doona ciqaabta u dhigan dembigaas oo loo kordhigyey ilaa 3 u dhig, haddii laakin uu galo fal ka gaabsi oo aan lagu tilmaamin qodobada sare ku xusan, kuwaas oo is hortaagi karo hab u socda howlaha doorshooyinka ama dhaawici kara natiijada codeynta wuxuu muteysan doona xarig ilaa 3 sano iyo ganax ilaa So 3,000.

**Qod. 70**
**Diidmada Qiil la'aan ee ka mid Noqoshada Goob ama Xafiis Doorashooyin**

Ciddii kadib markii lagu qoray goob ama xafiiska doorashooyinka diida sabab la'aan am aka dhuunta in uu shaqada ka qeyb galo wuxuu muteysan doona gaan ilaa So 600.

Isla ganaax waxaa muteysan doono howlwadeenada sabab la'aan isaga taga shaqada iyadoo aysan dhamaanin.

**Qod. 71**
**Luumista Xuquuqda Siyaasadda iyo Maxkamadeeynta Tooska ah**

Xukunka ciqaabta ee lagu rido dembiyada la xirira doorashooyinka oo uu Garsooruhu xukmiyo xarig aan ka yareeyn 2 sano , waxay kallifi doonaan in cod bixiyuhu uu lumiyo xuquuqdiisa coddeynt ama in la doorto ilaa iyo muddo 5 sano.

Waxaa lagu gaari doona xukun toos ah.

**CINWAANKA 9AAD**
Amaradda Gunnanadka iyo Kuwa ku meel Gaarka ah

**Qod. 72**

Xeer Ilaaliyuhu wuxuu kormeerayaa – hubsanayaa si toos haddi loo baahdo-on howl kasto oo sharcigaan xusaayo in madaxa aagyadu ay hirgeliyaan muddada iyo qaabka loogu tala galay.

**Qod. 73**

Haddii ayadoo la cuskanaao dekreetada maamulka ee lamb 7 ee 22 Marso 1958, Guddomiyeyaalka degmooyinka loo xilsaaro jagada Garsooraha degmada, howlaha uu sharciga ka doonayo in Garsooraha degmada fuliyo waxaa loo xilsaari doono qof la magacaabay oo u qalmato kadib markii ay soo jeediyey xeer Ilaaliyaha, Garsooraha gobolka ee u xilsaaran.

**Qod. 74**

Guddomiyeyaasha degmooyinka oo laga doonayo fulinta howlaha doorashooyinka meela ka fog saldhigyadooda, waxay wakiilan karaan duqa magaaladaha ama shaqaaleh ka tirsan maamulka.

Wakiilashadaasi waxaa iska leh wakiilka degmada.

**Qod. 75**

Golaha sharci dejinta ee la soo doortay kadib markii la dabaqay sharcigaan wuxuu xilka hayn doonaa ilaa iyo 5 sano laga bilaabo maalintii ay yeeshen shirkooda kowaad.

**Qod. 76**

Shirka ugu horreyo waa in uu dhaca hal bil gudaheeda maalintii lagu dhawaaqay natiijooyinka doorashada.

**Qod. 77**

Sharcigaan wuxuu hirgeli doona markii lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Somaliya. Waxaa isla markaas la buriyey amar-sharciga lamb. 6 ee 31 Maarso 1955.

Sharcigan waxaa lagu keydin doona Keydka Rasmiga ah ee Shuurucda waxaana lagu daabici doona Faafinta Rasmiga ah. Waxaa la faraaya in cidkasto ay u sharcigaan u hoggansanato una hoggamiso cidkasta ee Somaliya.

Muqdisho, 12 Disember 1958.

Maamulaha Guud

**M. di Stefano**

Rai’sul Wasaaraha
**Abdullahi Issa Mohamud**

Wasiirka Arrimaha Gudaha
**Haji Mussa Boqor**

**SHAXDA LA XIRIIRTA QODOBKA 3**

**QEYBINTA KURAASTA**

**MIGIURTINIA**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | — Bosaaso | kursi | 2 |
| 2. | — Qandala | | 1 |
| 3. | — Caluula | | 1 |
| 4. | — Iskushuban | | 2 |
| 5. | — Qardho | | 3 |
| 6. | — Eyl | | 4 |
| | | | --- |
| Tirada guud ee kuraasta. | | | 13 |

**MUDUG**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Galkacyo | kursi | 4 |
| 2. | Ceel Buur | | 4 |
| 3. | Dhusamareeb | | 3 |
| 4. | Hobya | | 2 |
| | | Tirada guud | 13 |

**HIIRAAN**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Beled Weyne | kursi | 5 |
| 2. | Bulo Burde | | 7 |
| | | Tirada guud | 12 |

**BANAADIR**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Muqdisho | kursi | 2 |
| 2. | Marka | | 3 |
| 3. | Jowhar | | 3 |
| 4. | Itala | | 3 |
| 5. | Baraawe | | 3 |
| 6. | Afgooye | | 2 |
| 7. | Wanle Weyn. | | 1 |
| 8. | Balcad | | 1 |
| | | Tirada guud | 18 |

**JUBBADA SARE**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Baydhaba | kursi | 6 |
| 2. | Buur Hakaba | | 6 |
| 3. | Xoddur | | 4 |
| 4. | Diinsor | | 2 |
| 5. | Bardheere | | 2 |
| 6. | Luuq | | 2 |
| | | Tirada guud | 22 |

**JUBBADA HOOSE**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Kismaayo | kursi | 3 |
| 2. | Afmadow | | 4 |
| 3. | Jamaama | | 3 |
| 4. | Jilib | | 2 |
| | | Tirada guud | 12 |

**GUNNANADKA**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | MIGIURTINIA | kursi | 13 |
| 2. | MUDUG | | 13 |
| 3. | HIIRAAN | | 12 |
| 4. | BANAADIR | | 18 |
| 5. | JUBBADA SARE | | 22 |
| 6. | JUBBADA HOOSE | | 12 |
| | | Tirada guud | 90 |